

Hakinta Daryeelka Carruurta ee Kheyraadka loogu talagalay Qoysaska

S: Waa maxay Shati-siinta Daryeelka Carruurta ee DCYF?

J: Department of Children, Youth, and Families (Waxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska, DCYF) waxa ay shati siisaa qiyaas ahaan 5,600 oo daryeelka carruurta ah iyo barnaamijyada waxbarashada ubadka iyo goobaha wax lagu baro ilmaha gaaray da'da dugsiga ee gudaha gobolka Washington. Daryeelka carruurta ee shatiga haysta iyo bixiyeyaasha waxbarashada ubadka waxa ay raacaan heerarka tayada aasaasiga ah, Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka Washington, WAC), oo uu u dajiyey gobolka si uu u xaqiijiyo in ilmaha jooga daryeelka shatiga haysta ay ku sugnaadaan deegaan leh badbaado, caafimaad iyo koritaan.

S: Waa maxay ka hakinta shatiga?

J: Waa tallaabo kumeelgaar ah oo ay DCYF isticmaasho si ay u ilaaliso ilmaha. Xarunta daryeelka carruurta masoo hawlgali karto inta ay kujirto hakinta. "Hakin," marka loo isticmaalo xaga tixraaca xaalada shatiga bixiyaha, micnaheedu waxa ay tahay tallaabo waaxda ay dhaqangeliso oo ay si kumeelgaar ah ku joojineyso shatiga si loo ilaaliyo caafimaadka, badbaadada, ama badqabka carruurta ka diiwaangashan ama dadweynaha. (WAC 110-300 - <https://app.leg.wa.gov/wac/default.asp?cite=110-300&full=true>)

S: Waa maxay sababta bixiyaha daryeelka carruurta looga hakinayo shatiga?

J: Qeyb kamid ah doorka ay DCYF ku xaqiijinayso in ilmaha ku sugan yihiin deegaan caafimaad qaba oo badbaada ah ayaa tixgelinaya eedaha sida:

- La'aanta kormeer ku filan
- Kobcin iyo daryeel aanan ku filneyn
- Deegaanka xarunta oo aan badbaado ahayn
- Anshax xumo aan habboonayn
- La'aanta fayadhowrka saxda ah (iyo walaacyada kale ee caafimaad)
- Eedeymaha xadgudubka ama dayaca ilmaha

Liiska kore ma wada soo koobayo waxaana laga yaabaa arrimo kale inay gacan kageystaan hakinta.

S: Maxaa ay DCYF ila wadaagi kartaa oo kusaabsan hakinta?

J: Sida ay ubadan tahay, hakinta waxa ay qeyb katahay baaritaan cabasho ah oo furan; sidaa daraadeed, macluumaad badan lagama yaabo in lagula wadaago. Waxaad ku hagaajin kartaa xafiiska gobolkaaga haddii aad su'aalo dheeraad ah qabto: <https://dcyf.wa.gov/find-an-office/el-offices>

S: Xaggee ayaan ka raadsan karaa xarun daryeel oo kale?

J: Waxaa jira dhawr waddo oo kala duwan oo aad kusoo sahmin karto si aad usoo hesho daryeelka canuga ku habboon:

- **Hubinta Daryeelka Carruurta**
<https://dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/child-care-check>
- **Ka Warqabka Daryeelka Carruurta ee Washington**
<https://childcareawarewa.org>
1 (800) 446-1114 iyo familycenter@childcare.org

S: Haddii aan qabo walaacyo dheeraad ah oo kusaabsan caafimaadka iyo badbaadada canugeyga ee ku sugan xarunta daryeelka carruurta, yaan wici karaa?

J: Fadlan wac 1-866-END-HARM

S: Haddii aan rabo inaan arko macluumaadka kusaabsan cabashada ama hakinta marka la dhammeystiro, sidee ayaan ku helayaa macluumaadkaas?

J: Dhammaan codsiyada shaacinta dadweynaha iyo siideynta diiwaanada, fadlan waaxdeena diiwaanada dadweynaha kala xariir <https://dcyf.wa.gov/public-records>. Waxaad sidoo kale qaar kamid ah macluumaadka Hubinta Daryeelka Carruurta kaheli kartaa <https://dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/child-care-check>.

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION LIC_0077 SM (07-2022) Somali



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES